



BERGEN
KOMMUNE

Ma bixineysaa qiimo yar xannaanada carruurta iyo SFO?

Qoysaska leh dakhli hoose waxay codsan karaan in ay bixiyaan qiimo yar xannaanada carruurta iyo SFO-ga (adeega skoolka kadib). Haddii dakhligiinu hooseyo, waxaad sidoo kale heli kartaan saacado wakhti dhexe oo bilaash ah. Saacado wakhti dhexe oo bilaash, waxaa macneheedu yahay in ilmuhu uu joogi karo xannaanada carruurta 20 saacadood toddobaadkii, iyadoo aydnaan ku bixin lacag.

Waxaad xaq u leedihiin inaad bixisaan qiimo yar haddii kharashyadiina booska xannaanada carruurta/SFO ka badan tahay boqolkiiba lix, dakhli wadareedka dadka guriga ku nool.

Cosaduhu waa inuu ku diiwan gashan yahay, isla ciwaanka ilmu ku diiwan gashan yahay ee xafiiska diiwaanka dadweynaha, si uu u codsado in uu bixiyo qiimo yar marka ay noqoto xannaanada carruurta iyo SFO.

Waa inaad ogolaatay booska xannaanada carruurta/SFO, ka hor inta aadan codsan qiimo dimista.

Qiimo dimistu waxay khuseeyaa joogista xannaanada carruurta/SFO. Idinka ayaa bixinaaya lacagta cuntada.

Qoysaska dhowr carruur u aadan xannaanda carruurta/SFO waxay sidoo kale helayaan qiimo dhimista-walaalaha. Tani macnaheedu waxa weeye inaad heli kartaan qiimo dhimis. Qiimo dhimista walaalaha uma baahnidiin inaad codsataan.

Sidan ayaad u codsanaysaa

1. Gal [Vigilo foreldreportal](#) (af-noorweeji keli aha ayuu ku qoran yahay).
2. Marka aad gashid , waxaad arkaysaa magacyada carruurtaada ee haysta boos xannaano carruur ama SFO. Dooro «Søknader» liiska/meny dhinaca bidixda. Riix «Ny søknad» doorona «Redusert betaling». Isku talaab ku calaamadee dhammaan carruurta aad u codsanayso.
3. Dakhliga shakhsiyadeed iyo ta hantiyeed, ee ay ku waajibto cashuur, ee qoyska, ee ku diiwaangashan isla cinwaanka ilmaha, waxaad ku qoraysaa isu-wadagayn dakhliga goobta «Samlet bruttoinntekt».
4. Marka aan go'aan ka gaareyno codsigaaga, Waxaa cadeynta dakhliga guud ee qoyska toos looga soo qaadeyaa xafiiska cashuuraadka. Warqadda ogeysiska cashuurta (skattemelding) ee ugu danbaysay ayaa lagu saleynayaa xisaabinta.
5. Jawaabta waxaad helaysaa saddex toddobaad kadib markaad cosatay. Haddii aad xaq u leedahay qiimo dhimis, waxaad bixinaysaa qiimo yar isla bisha aad soo codsatay bisha xigta.

Ma u baahan tahay warbixin dheeri ah?

- Ka akhri wax badan oo ku sahabsan xadka dakhliga iyo nidaamka qiimo dhimista: [Søke om redusert foreldrebetaling](#) (ku qoran af-noorwiji keli ah).



BERGEN KOMMUNE

- Adeegga dadweynaha (Innbyggerservice) waxay kaaga jawaabi karaan weydiimaha ku sahabsan qiimo dhimista ee xannaanada carruurta iyo SFO.

Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad codsato haddii adiga iyo ilmaha aydnaan lahayn lambarka shakhsiga ee noorwiiijiga (norsk personnummer). Taleefanka: 55 66 55 56. Waxaad tegi kartaa sidoo kale Adeegga dadweynaha (Innbyggerservice) ee Kaigaten 4. wakhtiga furnaanta: 08:00 – 15:00.